Soo Koobidda Faa'iidooyinka iyo Caymiska: Waxa Qorshahani Daboolayo & Waxa Aad Bixinayso
Adeegyada Caymiska Leh
Mudada Caymiska: **08/01/2025 – 07/31/2026**
Caymiska loogu talagalay: **SEIU Healthcare NW Health Benefit Trust – Qorshaha Magdhawga Caafimaadka ee Progyny ee Taranka & Uurka iyo Dhalmada Kadib**

Dukumeentiga Dulmarka Faa'iidooyinka iyo Daboolida (Summary of Benefits and Coverage – SBC) wuxuu kaa caawinayaa inaad doorato qorshe caymis caafimaad. SBC-gu wuxuu kuu muujinayaa sida adiga iyo qorshaha caymisku u wadaagi lahaydeen kharashyada adeega caafimaadka ee daboolan. Tani waa oo keliya dulmar. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan caymiskaaga, fadlan la xiriir tababarahaaga Progyny ee uurka iyo dhalmada ama wakiilka daryeelka bukaanka Progyny Fertility (PCA) adigoo wacaya (833) 233-0517.

| Su'aalaha Muhiimka Ah | Jawaabaha | Waa Maxay Micnaha Tani: |
|---|---|---|
| Waa maxay wadarta guud ee deductible-ka? | Qof keliya: $0<br>Qoyska: $0 | Qorshayaashaada Progyny ma laha wax laga jarayo (deductible). |
| Ma jiraa lacag aad bixinayso marka adeeg la helo (copayment)? | Maya. | Qorshayaasha Progyny ee taranka iyo uurka & dhalmada kadib ma laha wax lacag-bixin ah (copayment). |
| Ma jiraa qayb aad ka bixiso adeegyada (coinsurance)? | Maya. | Qorshayaasha Progyny ee taranka iyo uurka & dhalmada kadib ma laha wax kharash wadaag ah (coinsurance). |
| Ma jiraan adeegyo la daboolo ka hor intaadan gaarin deductible-kaaga? | Maya. | Uma bixin doontid wax kharash ah jeebkaaga adeegyada taranka iyo uurka & dhalmada kadib ee Progyny. Dhammaan adeegyada lagu bixiyo qorshahan waa adeegyo ka hortag ah (preventive care) mana saarna wax kharash wadaag ah. |
| Ma jiraan deductible-yo gaar ah oo adeegyo khaas ah loogu talagalay? | Maya. | Lama rabo wax lacag goyn ah (deductible) qorshayaasha HRA ee Progyny ee taranka iyo uurka & dhalmada kadib. Dhammaan adeegyada lagu bixiyo qorshahan waa adeegyo ka hortag ah mana saarna wax kharash wadaag ah. |
| Waa maxay xadka ugu badan ee aad jeebkaaga ka bixinayso qorshahan? | Qof keliya: $0<br>Qoyska: $0 | Ma jiro xad kharash oo gaar ah (out-of-pocket limit) oo ku saabsan qorshayaashaada Progyny. |

| | | |
|---|---|---|
| Ma bixin doontaa lacag ka yar haddii aad isticmaasho bixiye ku jira shabakad (network)? | Lama dabaqayo. | Tababarayaasha iyo bixiyeyaasha daryeelka ee Progyny ee ku takhasusay bacriminta, uurka iyo daryeelka dhalashada kadib waxay dhammaantood ku jiraan qorshahan. Ma jiraan wax faa'iidooyin ah oo la heli karo tababarayaal aan ka tirsanayn Progyny. |

**Adeegyada Ka Reeban & Adeegyada Kale ee La Daboolay:**
Waxyaabaha laga reebay waxaa ka mid ah qalabka saadaalinta ovulation-ka ee guryaha lagu isticmaalo, adeegyada iyo sahayda uu bixiyo bixiye aan shabakad ka tirsanayn, iyo daawaynta ay Ururka Mareykanka ee Daawaynta Taranka u arkaan inay tahay mid tijaabo ah. Dhammaan kharashaadka la xiriira adeegyada loo sameeyo qof xambaarsan ilmaha (gestational carrier), oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn lacagaha baaritaannada sheybaarka, lama daboolo. Haddii dhakhtarkaagu codsado adeegyo aan ku qorneyn hagahan, fadlan la xaqiiji caymigaaga PCA-daada. Waxaa jira adeegyo aan ku jirin daboolidda Progyny; si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in lagu helo qorshahaaga caafimaad.

**Xuquuqdaada Si Aad U Sii Wadato Caymiska:**
Waxaa jira hay'ado kaa caawin kara haddii aad rabto inaad sii waddo caymiskaaga marka uu dhammaado. Macluumaadka xiriirka ee hay'adahaas waa: Healthcare.gov: www.HealthCare.gov ama wac 1-800-318-2596, ama suuqyada caymiska caafimaadka ee gobolkaaga (state health insurance marketplace) ama SHOP. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inay jiraan xulashooyin caymis kale oo kuu diyaar ah, oo ay ku jiraan inaad iibsatid caymis shaqsiyeed oo laga helo suuqyada Health Insurance Marketplace. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan Marketplace-ka, booqo www.HealthCare.gov ama wac 1-800-318-2596.

**Xuquuqdaada Cabashada iyo Racfaanka:** Waxaa jira hay'ado kaa caawin kara haddii aad qabto cabasho ku saabsan qorshahaaga, gaar ahaan haddii lagaa diiday sheegasho caafimaad. Cabashadan waxaa loo yaqaan "grievance" ama "appeal." Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, fiiri sharaxaadda faa'iidooyinka (explanation of benefits) ee aad ka heli doonto sheegashadaada caafimaad. Dukumentiyada qorshahaaga sidoo kale waxay bixiyaan macluumaad buuxa oo ku saabsan sida loo gudbiyo sheegasho, racfaan, ama cabasho sabab kasta ha ku timaadee qorshahaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, ogeysiiskan, ama caawimo, booqo www.dol.gov/ebsa/healthreform iyo http://www.cms.gov/CCIIO/Resources/Consumer-Assistance-Grants.

**Qorshahan ma bixiyaa Daryeelka Aasaasiga ah ee Loo Baahan Yahay (Minimum Essential Coverage)? Lama dabaqo.**
Caymiska Aasaasiga ah ee Loo Baahan Yahay guud ahaan wuxuu ka koobanyahay qorshayaal, caymis caafimaad oo laga heli karo Suuqa Caymiska ama siyaasado kale oo gaar ah, Medicare, Medicaid, CHIP, TRICARE, iyo qaar kale oo caymis ah. Haddii aad u qalanto noocyo gaar ah oo Caymis Aasaasi ah, waxaa laga yaabaa inaadan u qalmin gunnada canshuurta ee caymiska.

**Qorshahani ma buuxiyaa Heerarka Qiimaha Ugu Yar? Lama dabaqo.**
Haddii qorshahaaga uusan buuxin Heerarka Qiimaha Ugu Yar, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto kreditka canshuurta si laguu caawiyo bixinta qorshe aad ka hesho Suuqa Caymiska Caafimaadka (Marketplace).